

Wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan Shigella ama inaad soo sheegto dadka qaba matag, shuban ama xummad kala kaasho cuno quudashada, la xiriiir:
Email: fhdepi@sdcounty.ca.gov
Telefoon: (858) 505-6814
Shabakada: www.sdcdheq.org



KAHORTAGA IYO XAKAMEYNTA CAABUQA SHIGELLA

Cudurka Shigellosis caadi ahaan wuxuu ku dhacaa si toos ah ama si dadban dabada-afka faddareysan. Inta badan caabuqyada Shigella waxay ku faafaan saxaro ama faraha wasakhaysan ee qof cudurka qaba qof kale iyada oo si toos ah loo taabto ama laga cuno cunto ama biyo wasakhaysan.

Tallaabada ugu muhiimsan ee looga hortago fayraska, bakteeriyada, iyo/ama cudurada dulinka waa in si joogto ah gacmaha loo dhaqo oo la raaco tilmaamaha hoose.

Gacmo-dhaqid

Si fiican ugu dhaq gacmaha iyo cududa saabuun iyo biyo diirran ugu yaraan 10 illaa 15 ilbiriqsi; si fiican ugu biyo raaci biyo nadiif ah, oo si fiican u qalaji gacmahooda iyo cududooda. Si gaar ah ugu fiirso meelaha cidiyaha hoostooda iyo faraha dhexdooda.

Gacmo dhaqistu waa inay dhacdaa xaaladaha soo socda:

- Kadib taabashada wejiga, ama meelaha kale ee maqaarka qaawan oo ay ku jiraan meelaha ku dilaacsan ama nabaro iyo ka dib taabashada timaha.
- Kadib markaad isticmaasho musqusha.
- Kadib markaad nadiifiso musqusha.
- Kadib markaad taabato xayawaanka.
- Kadib markaad qufacdo, hindhisto, adigoo isticmaalaya marada gacanta ama nudahtiishka la tuuro.
- Kadib markaad isticmaasho tubaakada, cunista, ama cabbitaanka.
- Kadib markaad gacanta ku hayso qalab ama maacuun wasakhaysan.
- Isla markiiba ka hor inta aan la bilaabin diyaarinta cuntada, oo ay ka mid tahay la shaqaynta cuntada aan diyaarsanayn, qalab nadiif ah iyo maacuun, iyo weelasha cuntada iyo maacuunta hal mar la isticmaalo ee aan duubnayn iyo kahor intaadan gashan gacmo-gashida la tuuri karo.
- Kadib ururinta iyo soo saaridda qashinka.
- Kadib markaad taabato dharka wasakhaysan, maro masaxday oo wasakhaysan, iwm.
- Kadib markaad ku hawlan tahay hawlo kale oo gacmaha sumayn kara.

Ka Hortagga Faafinta Cudurka

- Ku dadaal dhaqidda gacmo -dhaqashada iyo nadaafadda shaqsiyanka ee wanaagsan.
- Iska ilaali inaad cunto u diyaariso dadka kale markaad jiran tahay.
- Nadiifi oo jeermiska ka saar meelaha dadweynaha, sida musqulaha (eeg bogga dambe).

Fayodhwrka Sagxadaha

- Ogsoonow: Sagxadaha waa in la dhaqaa oo la biyo raaciyaaa ka hor tallaabada fayadhowrka.
- Isticmaal mid ka mid ah milanta soo socda:
 - 1) La xiriir faleebada 100 ppm oo milanta maadada (chlorine-ta) ah oo la heli karo ugu yaraan 30 ilbiriqsi.
 - 2) La xiriir faleebada 25 ppm oo milanta maadada (iodine-ta) ah oo la heli karo ugu yaraan hal daqiiqo.
 - 3) La xiriir faleebada 200 ppm oo milanta maadada (ammonium-ta) ah oo la heli karo ugu yaraan hal daqiiqo.
 - 4) La xiriir wax kasta oo nadiifiyaha kiimikada ah oo buuxiya shuruudaha Qeybta 180.940 ee Cinwaanka 40 ee Xeerarka Sharciga Federaalka marka loo isticmaalo si waafaqsan tilmaamaha isticmaalka soo -saaraha.

Hababka Nadiifinta Gaarka ah ee Qashinka Aadanaha

Nadiifinta Daadashada Shubanka, Matagga ama Saxarada:

1. Isticmaal qalabka ilaalinta shaqsiyeed (PPE), sida galootyada, maaskaro, iyo goonnada si aad naftaada iyo dharkaaga uga ilaaliso faddarayn.
2. Aagga xidh isla markiiba
3. Nadiifi qashinka la arki karo adigoo isticmaalaya wax la nuugo oo la tuuro (shukumaano waraaqo ah ama maro kale oo la tuuro) oo yaree aerosols -ka.
4. Si taxaddar leh u tuur waxyaabaha wasakhaysan oo ku rid bacda aan waxba isugu gudbin.
5. Si xor ah u nadiifi oo jeermistir aagga iyo walxaha ku xeeran faddarada leh jeermis-dile habboon.
6. Iska saar gacmo-gashiga, goonnada, iyo maaskaro, siday u kala horreeyaan, oo iska tuur ka hor intaadan ka bixin aagga nadiifinta ee wasakhaysan.
7. Ku rid PPE -da la tuuray bacaha aan waxba isugu gudbin.
8. Gacmo-gashiga xiro oo bacda ku rid weel qashin ah oo sugan; ha u oggolaan in bacdu taabato dharkaaga.
9. Mar walba dhaq gacmahaaga kadib markaad taabato wax kasta oo wasakhaysan, qashin, ama gudaafad.

Tilmaamaha Guud ee Caafimaadka Dadweynaha

Maxaad samaynaysaa haddii aad u malaynayso inaad la kulantay bakteeriyada shigella?

- Qof kasta oo leh astaamaha shigellosis waa inuu la xiriiraa bixiyaha xanaanada caafimaadka si loo baaro loona daweyo. Feejignaan taxaddar leh in gacmaha lagu dhaqo saabuun iyo biyo ayaa ah tallaabada kaliya ee ugu muhiimsan ee lagu yareynayo faafitaanka Shigella.
- Dib u eeg CDC Shigella [xaashida xaqqiigda](#) oo bixisa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shigellosis, oo ay ku jiraan calaamadaha iyo astaamaha, siyaabaha uu u faafo, iyo waqtiga ay qaadato si aad u xanuunsato kadib jeermiska.
- Si aad u soo sheegto maamule cunto oo xanuunsan ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan cudurrada ka dhasha cuntada, fadlan la xiriir Epidemiology Liaison iimeylkiisa fhdepi@sdcounty.ca.gov or (858) 505-6814.
- **Haddii aad qabtid su'aalo guud oo ku saabsan dillaaca shigellosis, fadlan la xiriir Degmada San Diego - Wakaaladda Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka (HSA) ka wac (619)-692-8499.**